



# Waalidka iyo ardeyda fasalka 9: aadow!

## Waxbarashada waajibka ahi wey sii kordheysaa laga bilaabo deyrta 2021.

Waxbarashada waajibka ahi hadda ka dib kuma soo gabgaboobeyso kaliya fasalka sagaalaad, ee waxaa waxbarashada waajibka ah oo lacag la'aan ah laga sii wadan karaa xilligga deyrta iskuuladda darajada labaad ama iskuulada kale ee waxbarashada waajibka ah lagu dhigto.

Bandhigan waxaanu kuugu sheegeynaa, maxaa looga jeedaa cusbooneysiintan maxayse tahay shuruudaha lagaaga baahan yahay ee waajibaadka dalbashadu.



## Maxaa looga jeedaa kordhinta waxbarashada waajibka ah?

Cusbooneysiinta sharciga awgeed waxbarashada waajibka ahina way sii kordheysaa laga bilaabo 1.8.2021 waxbarashooyinka darajada labaadna waxay noqonayaan kuwo lacag la'aan ah. Hadafka laga leeyahayna waa, in hadda ka dib qof kasta oo dhallinyaro ah oo Finland deggani uu dhameeyo sidoo kale waxbarashada darajada labaad shahaadadeeda. **Waxbarashada waajibka ahi waxay soconeysaa ilaa iyo inta uu qofka dhallinyarada ahi ka buuxinayo 18 sano.**

## Maxaa markaas ka dib looga jeedaa waajibaadka dalbashada?

Waxbarashada waajibka ah ee sii kordheysa awgeed dhammaan dhallinyarada dhameyneysa waxbarashada aasaasiga ah oo dhan waxaa khuseeya waajibaadka dalbashada. Waxaana looga jeedaa, **in qof kasta oo dhameeya waxbarashada aasaasiga ah ay tahay inuu dalbado dalab wadareedka guga ama dalabyada sii socda ee iskuulada xidhiidhka ah.**

Waxaad dalban kartaa dugsi sare, iskuuladda xirfadaha, fasalka tobnaad, iskuuladda u diyaarinta waxbarashada ama kuwa kale ee ku jira xeyn daabka iskuuladda waxbarashada waajibka ah. Waajibaadka dalbashadu wuu sii soconayaa, ilaa iyo inta ka heleysid boos waxbarasho oo lagu xaqiijinayo.

## hadaba sidee loo dalban karaa

**Dalab wadareedka wuxuu bilaabanayaa talaadada 23.2.2021 wuxuuna dhammaanayaa talaadada 23.3.2021 saacadu markey tahay 15.00.**

Warbixino ku saabsan dalab wadareedka waxaad ka heleysaa cinwaankan [opintopolku.fi](http://opintopolku.fi), kuwaas oo aad ka dalban kartid qeybaha ugu badan ee iskuuladda darajada labaad. Haddii aad dooneysid waxaad dalban kartaa iskuuladda ka baxsan dalab wadareedka.

Tusmooyin iyo talooyin waxaad weydiisan kartaa tusaale ahaan hagaha waxbarashada ee iskuulka!

## Waa maxay sababta loo kordhinayo waxbarashada waajibka ah?

Waxbarashada waajibka ah waxaa loo kordhinayaa, sababtoo ah shaqadu mustaqbalka wey sii adkaaneysaa oo iskuma dabari kartid haddii aanad haysanin shahaadada darajada labaad. Sidaas awgeed ayaa la rabaa in dhallinyar kasta loo dammaanad qaado shahaadada darajada labaad.

Kordhinta waxbarashada waajibka ah hadafka laga doonayaa waxay kala yihiin arrimahan soo socda:

- kor u qaadista waxbarashada- iyo aqoonta dadka finnishka ah
- yareynta farqiga u dhexeeya waxbarashooyinka
- sinaanta waxbarashada iyo kordhinta sinaanta
- hagaajinta badqabka/ nolol wanaaga dhallinyarada
- kor u qaadidda heerka shaqaaleysiinta

Waxbarashada waajibka ah kordhinteedu waxay isla markaas noqoneysaa in la ballan qaado waxbarashada darajada labaadna in ay lacag la'aant noqoto. Sidaas awgeed waxbarashada lacag la'aanta ah iyo cuntada waxaa u dheer dhallinta waxbarashada waajibka ah dhigata iyo waalidkood midkoodna uma baahna in ay ka warwaraan tusaale ahaan buugaagta waxbarashada, safarada iskuuladda masaafadoodu ka dheer tahay todoba kilomitir, waxbarashada qalabka loogu baahan yahay amaba kharashka ku baxaya imtixaanaadka ugu dambeynta ah.





Warbixino dheeraad ah oo ku saabsan waajibaadka kordhinta waxbarashada ah waxaad ka heleysaa Instagramka iyo bogga shabakadaha:

- [@okmfi](https://www.instagram.com/okmfi)
- [minedu.fi/oppivelvollisuuden-laajentaminen](https://www.minedu.fi/oppivelvollisuuden-laajentaminen)
- [oph.fi/oppivelvollisuus](https://www.oph.fi/oppivelvollisuus)



Opetus- ja  
kulttuuri-  
ministeriö



OPETUSHALLITUS  
UTBILDNINGSTYRELSEN

[Opintopolku.fi](https://www.opintopolku.fi)

